## MACLUUMAADKA CODAYNTA XULASHOOYINKA DARAJO KALA SIINTA

**Waa maxay Codaynta Xulashada Darajo Kala Siintu?**

Codaynta xulashada darajo kala siintu (RCV) waxaa weeye qaab doorasho oo u sahlaya codeeyayaasha ikhtiyaarka inay darajo kala siiyaan musharixiinta sida ay u kala doorbidaan (ikhtiyaarka kowaad, ikhtiyaarka labaad, ikhtiyaarka sadexaad, iyo wixii la hal maala). Darajo kala siinta musharixiintu waxay ka duwan tahay xulashada fudud ee hal mushaharax ama waxa loo yaqaan doorasho wadareedka. Hadii musharax uu helo 50% wax ka badan xulashada kowaad, musharaxaas ayaa guulaysanaya, sida doorashadooyinka kale oo kale. Laakiin, hadii aanay jirin cid aqbalabiyada heshey marka la tiriyo ikhtiyaarada kowaad, tartankaas meesha ayaa laga saarayaa oo lama kala badin. Musharaxa hela codadka ugu yar wuu ka baxayaa, oo codeeyayaasha markii hore ikhtiyaarkooda kowaad u doortay musharaxaasi waxa codkooda loo xisaabin kan ikhtiyaarkooda labaad u ahaa. Nidaamkan waa lagu celcelinayaa ilaa inta musharax helayo wax ka badan 50% codadka.

Muuqaalka sida codadka loogu tiriyo isreebreeb, booqo NYC Votes.

**Maxaan u adeegsanaa Codaynta Xulashada Darajo Kala Siinta?**

Maarso 2021, dadka deggan Burlington waxay u codeeyeen dhaqan gelinta Codaynta Xulashada Darajo Kala Siinta Xildhibaanada Magaalada. Waxay ku ansaxday taageerada 64%.

**Doorashadee ayaa loo adeegsadaa Codaynta Xulashada Darajo Kala Siinta?**

Burlington waxay kaliya adeegsan doontaa Codaynta Xulashada Darajo Kala Siinta doorashada Xildhibaanada Magaalada.

**Sidee ayaan u calaamadinayaa warqadayda codaynta?**

Codaynta Xulashada Darajo Kala Siinta, codeeyayaashu waxay ku calaamadin doonaan waraaqahooda codaynta sida ay u kala horeeyaan ee ay u doorbiyaan - Ikhtiyaarka 1aad, ikhtiyaarka 2aad, ikhtiyaarka 3aad, iyo wixii la hal maala.

1. Xulo musharaxa xulashada kowaad adiga oo buuxinaya gebi ahaanba goobada ku xigta magaca musharaxa ee kolomka XULASHADA KOWAAD.

2. Hadii aad leedahay musharax xulashada labaad ah, waxa aad gebi ahaanba ku buuxinaysaa goobada xigta magaca musharaxa ee kolomka XULASHADA LABAAD.

3. Hadii aad leedahay musharax xulashada sadexaad ah, waxa aad gebi ahaanba ku buuxinaysaa goobada xigta magaca musharaxa kolomka XULASHADA SADEXAAD.

4. Waxa aad sii wadaysaa kala siinta darajada musharixiinta ilaa inta ay kaa dhamaanayaan inta la ogol yahay ee darajada la kala siinayo ama musharixiintu dhamaanayaan.

**Qodobo muhiim ah oo ku saabsan calaamadinta Codaynta Xulashada Darajo Kala Siinta warqada codaynta:**

- Kaliya ku calaamadi hal ikhtiyaar halkii kolom.
- Kaliya ku calaamadi hal ikhtiyaar halkii mushahax.
- Waa in aanad ka boodin kala siinta darajada. Tusaale ahaan, waa in aanad buuxin xulashada 1aad iyo 3aad adiga oo aan buuxin xulashada 2aad.

Khayraadka: *Xarunta Khayraadka Codaynta Xulashada Darajo Kala Siinta*, https://www.rcvresources.org/.

- Waxa aad kala siin kartaa darajada musharixiinta ugu tirada yar ee aad doonayso.
- Waxa aad kala siin kartaa darajada musharixiinta ugu badan ee la ogol yahay.
- **TUSAALAHA 1:**

**Warqada codaynta sida saxda ah u calaamadsan, taas oo codeeyuhu uu ku muujiyay xulashada $1^{aad}$, $2^{aad}$, iyo $3^{aad}$.**

| **MUSHARIXIINTA** | XULASHADA 1AAD | XULASHADA 2AAD | XULASHADA 3AAD |
|---|---|---|---|
| istaroobari | ○ | ○ | ● |
| shaglaydh | ● | ○ | ○ |
| faniila | ○ | ● | ○ |

**TUSAALAHA 2:**

**Ugu codaynta darajada 2aad in ka badan inta la ogol yahay iyada oo xulashada 1aad loo calaamadeeyay si sax ah, laba musharax ayaa lagu calaamadiyaa xulashada 2aad, xulashada 3aadna lama calaamadiyo.**

Sida warqadan codaynta loo tirinayo:

- Xulashada kowaad ayaa la tirin doonaa.
- Codadka xulashada labaad lama tirin doono-waxay codeeyayaashu doonayaan lama garan karo maadaama oo kolomka in ka badan inta la ogol yahay loo codeeyay.

| **MUSHARIXIINTA** | XULASHADA 1AAD | XULASHADA 2AAD | XULASHADA 3AAD |
|---|---|---|---|
| istaroobari | ● | ○ | ○ |
| shaglaydh | ○ | ● | ○ |
| faniila | ○ | ● | ○ |

**TUSAALAHA 3:**

**Ku qorista darajooyin oo isla musharax lagu calaamadinayo xulashada 1aad, 2aad, iyo 3aad.**

Sida warqadan codaynta loo tirinayo:

- Xulashada kowaad ayaa la tirin doonaa.
- Hadii tartanka uu ka baxo musharaxa xulashada kowaad, xulashada labaad iyo sadexaad laguma xisaabtamayo, maadaama oo lagu celceliyay iska qofkaas.

| **MUSHARIXIINTA** | XULASHADA 1AAD | XULASHADA 2AAD | XULASHADA 3AAD |
|---|---|---|---|
| istaroobari | ● | ● | ● |
| shaglaydh | ○ | ○ | ○ |
| faniila | ○ | ○ | ○ |

Khayraadka: *Xarunta Khayraadka Codaynta Xulashada Darajo Kala Siinta*, https://www.rcvresources.org/.